

Su'aalo iyo Jawaabo

“S: Muxuu wareysigu ku saabsan yahay?

Wareysiga waxaa la isku weydiin doona sida aad markii ugu horeysay ku ogaatay in ilma aad dhashay uu qabay xanuun dhimirka ah, iyo waxyaabaha aad ilaa hadda ka qabatay si aad ugu hesho daaweyn ama caawimaad.

S: Ka warran haddii aan ilmahayga weli loo sameyn wax ah daaweyn ama caawimaad?

Waxa aan rabno waa in aan la hadalno waalid kasta, xataa haddii aan ilmaha ay dhaleen weli loo bilaabin wax ah daaweyn ama caawimaad ay ka heleen xarunta dhimirka carruurta.

S: Haddii aan iska diiwaan gelinayo intarnetkka, wareysiga miyaan ballan u sii qabsanayaa?

Maya, lagaama rabo in aad sii qabsato wakhtiga wareysiga. Qof ayaa kula soo xiriiri doona si laguugu qabto ballanta wareysiga, laakiin khasab kuguma aha in aad oggolaato wareysiga.

S: Muddo intee le'eg ayuu qaadan doonaa wareysigu?

Wakhtiga wareysigu wuxuu ku xiran yahay hadba heerka adeegyada ama sida lagu caawiyo iyo sida aad adigu ula tacaasho ilmahaaga. Qiyaas ahaan wareysigu wuxuu qaadan doonaa ilaa iyo 45 daqiiqadood.

S: Halkee iyo wakhtigee ayaa la igu wareysan doonaa?

Qofka wareysiga qaadaya ayaa kula soo xiriiri doona oo kuu qaban doona ballanta wareysiga wakhtiga kuugu habboon. Wareysiga guud ahaan waxaa lagu qaadaa taleefan ama fiidiyowga fogaan-aragga ah ee Zoom, laakiin qof ayaa si shakhsi ah kuula kulmaya haddii aad rabto.

S: Maxaan anigu ka faa'iidayaa wareysiga la iga qaadayo?

Waxaan dadka uga mahad celineynaa wakhtigooda, oo waxaa qof kasta la siinayaa \$25 oo ah kaar hadyadeed nooca Target ama Walmart, hadba kii uu qof kasta doorto.

S: Jawaabaha wareysiga miyaa lala sii wadaagi doonaa meelo kale?

Jawaabaha waalidka oo dhan waa la isugu geyn doonaa oo lama kala garan karo sida ay uga jawaabeen. Magacyada waalidka ma arki karaan dad ka baxsan kooxda mashruuca ka shaqeyneysa oo laguma dhex qorayo warbixinta guud ee aan ka soo saareyno.

S: Ma la igu wareysan karaa luuqad kale oo aan ahayn afka Ingiriiska?

Markaad is diiwaangelineyso noo sheeg haddii aad doorbideyso in luuqad kale lagu wareysto si aan u sii dalban karno luuqadda aad wareysiga ku rabto.

S: Sidee baa loo isticmaalayaa natiijooyinka wareysiyada ka soo baxa?

Natiijooyinka wareysiyada waxaa lala wadaagi doonaa dadka ka shaqeeya daaweynta caafimaadka dhimirka carruurta ee degmada Hennepin County oo dhan, oo waxaa loo adeegsanayaa in lagu horumariyo qorsheyaal lagu taageerayo waalidiinta raba in ay carruurtooda u helaan daaweyn iyo caawimaad.

S: Anigu ma arki karaa natiijooyinka mashruuca?

Wareysiga marka laga qaado, waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad rabto in aad koobbi ka hesho natiijooyinka mashruuca ka soo baxo. Haddii aad rabto natiijooyinka waxaa lagu soo diri karaa dabayaaqada sannadkan.”